FAAFINTA RASMIGA

الرسمية الجريدة

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 18 .5-aad. Garowe .28/12/2016. Lam.12.

Faafinta bil walba soo baxda جريدة الشهرية

*Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland*

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihirsa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Xerka ansixinta wax ka bedelka Xeerka warbaahinta puntland.**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

***Xeer Lr..5. 28/12/2016, kuna saabsan Ansixinta wax ka bedelka Xeerka Warbaahinta puntland.***

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

Xeerka Lr.5.ee28/12/ 2016, kuna saabsan ansixinta wax ka bedelka xeerka warbaahinta puntland.

**Madaxweynaha Dawladda Puntland:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARAY:- | Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad; |
| MARKUU ARKAY:- | Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/98/ 2016 ee 24/12//2016. |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland. |

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka wax ka bedelka Warbaahinta Dawladda Puntland.

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka Xeerkani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Prof. Cabdiweli Maxamad Cali Gaas.**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**

**DAWLADDA PUNTLAND**

**EE SOOMAALIYA**

**GOLAHA WAKIILADA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**

**مجلس النواب**

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

---

*Ref:*-XGGW/DPL/ 98 /2016 Garoowe, Sabti Date:- 24/ 12 /2016

Ku:- Madaxweynaha DPL Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta wax ka bedelka Xeerka Warbaahinta Puntland

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-**

MARKUU ARKAY: Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 64-aad

MARKUU ARKAY: Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/314 /2016 ee August 20/2016 kuna saabsan Ansixinta Xeerka Warbaahinta Puntland.

MARKUU TIXELIYEY: Baahida loo qabo Ansixinta wax ka bedelka Xeerka Warbaahinta Puntland.

MARKUU ARKAY: Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhigii 38-aad fadhiga 14-aad ee 06 /12 /2016 Ansixinta wax ka bedelka Xeerka Warbaahinta Puntland

**Wuxuu Guddoomiyey:**

**Ansixinta wax ka bedelka Xeerka Warbaahinta Puntland**

Allaa Mahad Leh

Md. Axmed Cali Xaashi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

---

Tell:- +252 90 7799977, Email: hashi7999@gmail.com, puntlandparliament@gmail.com

DAWLADDA PUNTLAND
KE SOOMAALIYA

ولاية بو نت لاند الصومال

# XEERKA WARBAAHINTA PUNTLAND

Garoowe, Dec. 22-2016

## FASIRAADO IYO ERAY-BIXIN:

| | |
|---|---|
| **Xeer:** | Waxaa loola jeedaa Xeerka Warbaahinta Dawladda Puntland. |
| Ablaawe: | Ilmaha aan aabbihii la aqoon ama aan ku dhalan guur sharci ah. |
| Wasaaradda: | Waxa loola jeedaa Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta, Dhaqanka iyo Hiddaha. |
| WWID&H: | Waa magaca Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta, Dhaqanka iyo Hiddaha oo la gaabiyay |
| Warbaahin: | Hab ay war-tebintu maqal, muuqaal iyo qoraal ugu faafiso warar, macluumaad, aqoon iyo maaweelo. |
| Saxaafad: | Hawl-qabad kasta oo saamaynaya maskaxda iyo afkaarta dadka, gaar ahaan wixii daabacan. |
| Gudiga sare Warbaahinta: | Gudiga sare wuxuu ka kooban yahay daneeyayaasha warbaahinta oo nidaamiya himilada xorriyadda ee saxaafadda |
| Suxufi/weriye: | qof kasta oo ka hawlgala soo-saarka mihnad saxaafadeed. |
| Madbacad Saxaafadeed: | Aalad makiinada ah loona adeegsado in lagu daabaco wargeysyo, kutub iyo dokomentiyo iyo agab kale. |
| Shirkad Madbacadeed: | Shirkad leh madbacad |

**Daabacaadle (Publisher):** Shankad leh loona oggol yahay in ay daabacdo oo qaybiso saxaafad daabacan oo magacyo kala duwan (sida wargeysyo, kutub, I.W.M.). Mabda' ahaan waxaa ay leedahay xaqa daabacaadda ee magacyada warbaahmta ay daabacdo iyo qoraallada ku yaal. Sidaa daraadeed waxaa ay mas'uul ka tahay macluumaadka ku yaal daabacaadeheeda. Dhaqaale ahaan waxaa ay mas'uul ka tahay wax soo saarkeeda saxaafadeed, lagula xisaabtamo.

**Wargeys:** warar, xog, dhacdooyin iyo faallooym daabacan, nidaamsan, Waqti kusoo baxa, joogtana dadka loogu gudbiyo.

**Mawjad:** Ilo dabiici ah oo xaddidan oo ay wbararka idaacaduhu ka baxaan, ayna maamusho Wasaaraddu.

**Cod/muuqaal-baahin (broadcast):** waa kanaal wareed loo adeegsado cod ama cod iyo Muuqaal Iswata si war ama xog loo baahiyo.

**Qalab Raadiye iswata** *(radio set):* aalad maqal la Isugu tebiyo hirarka hawada wararka, Dhacdooymka, barnaamijyo iyo nooc kasta oo macluumaad ah.

**Xarun Raadiye:** Xarun warbaahin oo soo saarta, faafisana warar laga tebiyo Hirarka raadiyaha ee hawada oo gaari kara dad badan oo baahsan.

**Telefishin iswata** *(television set),* Aalad maqal iyo muuqaal ah, laguna gudbiyo wararka (sida raadiyaha).

**Xarun Taleefishan:** Xarun warbaahin oo soo saarta, faafisana warar iyo macluumaad kuna baahisa ama ka lalisa satalayt, anteeno (antenna) ama saxan (dish) hab maqal-muuqaal u shaqeeya oo gaari kara dad badan oo baahsan.

**Warbaahin bulsho:** Warbaahin (xarun) ay leedahay, ay maamusho, ayna maalgashato 'bulshadu'; mararka qaarkood waxaa loogu yeeraa 'warbaahin degaan' ama warbaahin u adeegta mujtamac gaara (dhul ahaan iyo dhaqan ahaan).

**Warbaahin Dawladeed/Qaran:** Warbaahin (xarun) ay leedahay oo ay dawladdu ama qaranku maamulo; dawladda ayaa mas'uul ka ah una

xilsaaran maamulka lacageed Iyo waxa ka baxaba.

**Warbaahin Gaar Loo Leeyahay:** Xarumaha warbaahineed ee ay leeyihiin shirkadaha gaarka ah (oo ku dhisan hab saamiley).

**Warbaahin Shacab:** Xarumaha warbaahineed ee 'shacabku' leeyahay ee hantida (sida canshuurta) ;lagu maalgeliyo waxa si toos ah mas'uul uga ah unala xisaabtamaya dadweynaha.

**Xarun/Hay'ad warbaahin:** xarun si sharci ah u diiwaan gashan taas oo soo saarta, faafisana xog/war: kuna soo saarta cod ama muuqaal, sida loo yaqaan xarun raadiye ama telefishan.

| | |
|---|---|
| Magac Warbaahin: | Magaca xarun ama hay'ad warbaahin. |
| Khad-dhexe (Medium): | madal ama khad laga faafiyo war ama macluumaad loogana gol-leeyahay in dadweynaha lagu wargelinayo, wax lagu baro laguna madadaaliyo. |
| Websayt *(website)*: | shabakad internetka laga daalacdo, laguna faafiyo macluumaad saxaafadeed. |
| Machad Saxaafadeed: | dugsi wax lagu baro suxufiyiinta oo laga barto saxaafadda. |
| Wacyi-gelin: | hab dadka lagu baraarujiyo, waxna lagu baro. |
| Faraxumayn: | si xoog ah uga doona galmo qof aan raalli ka ahayn; isku-day ama ku kac fal kufsi. |
| Ruqsad (permit): | oggalaansho Wasaaraddu bixisay ama bixin doonto. |
| Shati (Licence): | fasax ay Wasaaraddu bixisay ama bixin doonto. |
| UWP: | Waa erey loo soo gaabiyay 'Ururka Warbaahinta Puntland. |
| Urur Warbaahin: | Urur caalami ah ama waddani ah oo aan dawli ahayn ama urur bulsho rayid ah oo difaaca, una dhaqdhaqaaqa danaha horumarinta aagga warbaahinta. |
| Urur Aan Dawli Ahay (NGO): | Urur Aan dawli ahayn, ururkaas ku diiwaan gashan xeerka nidaamiya Ururrada aan Dawliga ahayn ahna urur bulsho rayid ah oo aan macaashdoon ahayn. |

Urur Caalami ah oo aan Dawli ahayn (INGO): Urur Caalami ah oo aan dawli ahayn, si aan faa'iido-doon ahayna uga hawlgala Puntland, xafiisyo ku leh kana diiwaan gashan Puntland Iyo dibaddaba.

Qof ka dhexmuuqda warbaahinta: Qof si firfircoon aalaaba uga muuqda ama u soo jiita dadweynaha oo gudbiya ama ka hadla arrimo jira ama xiiso leh. Intaa waxaa dheer qof bulshada dhexdeeda can ka ah sababo gaar ah dartood; qofka Iskii uga qayb qaata doodaha arrimaha la Isku hayo ee muran ka taagan yahay, sidaa daraadeedna warbaahinta ku lug leh si uu u gudbiyo aragtidiisa.

Anshaxa Warbaahinta: Anshaxa warbaahintu waa xeer hoosaadka *(code of conduct)* hey'ad warbaahineed dhigato si ay u Ilaaliso una difaacdo mihnadda warbaahinta iyo dadka ka shaqeeya. Dadka ka shaqeeya warbaahinta baa samaysta si ay isaga badbaadiyaan in ay gaf ka galaan bulshada ama wixii difaac sharci u noqon lahaa hadday gef galaan.

Anshax *(Ethics)* Anshaxu waa qaybta go'aan-qaadashada lagu kala sooco waxa saxa ah Iyo waxa khaladka ah, waxa qumman iyo waxa aan qummanayn, waxa falalka aan samaynayo la qaadan karo iyo waxa aan laga qaadan karin. Waa hannaan lagu kala sooco wanaagga iyo xumaanta marka lala kaashado damiirka iyo waajibaadka aadanaha

## QODOBKA 1AAD

## Nidaam Guud

1. Xeerkan Saxaafaddu wuxuu qeexayaa nidaamka guud iyo kan farsamo ee saxaafadda. Waxaa uu macnaynayaa xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha warbaahinta. Xeerkani waxaa kale oo uu qeexayaa hawlgalka Guddiga Sare ee Warbaahinta.

2. Tub-raaca *(policy)* warbaahinta Puntland, mid dawladeed Iyo mid gaar ahba, waxaa guud ahaan maaraysa Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta, Dhaqanka Iyo Hiddaha Dawladda Puntland.

3. Qodobbada xeerkan ayaa qaabaynaya habka maaraynta warbaahinta Puntland.

4. Qaybaha ka hadlaya 'Waajibaadka Iyo Xuquuqaha Warbaahinta Iyo Warfidiyeenka' Iyo 'Guddiga Sare Warbaahinta' waxaa si Isku mid ah loogu dhaqayaa warbaahinta qaranka/dawladdu leedahay Iyo warbaahinta gaarka loo leeyahay labadaba.

## Qodobka 2-aad

## Macnaha Warbaahin

Warbaahintu waa hab dadka loogu gudbiyo warar, aqoon, madadaalo, khudbado, afkaar, macluumaad oo qaab maqal, muuqaal, qoraal ama masrixiyad ah loo adeegsado qalabka war-tebinta. Qalabkaas wax lagu gudbiyo waxaa ka mid ah wargeysyada, raadiyaha, telefishanka, wakaaladaha wararka, websaydyada, sawirrada, filimada, sawir-gacmeedyada, buugaagta Iyo agabka kale ee la daabaco ee wartabin loogu talo galay.

## QODOBKA 3-AAD

## Xuquuqaha iyo Waajibaadka Warbaahinta

1. Xorriyadda warbaahintu waa lama taabtaan, waxaana aqoonsan, xaqiijin suganna siinaya Dastuurka Puntland, waxana ay xushmad iyo qiime ka mudan tahay geyiga Puntland.

2. Xorriyadda Warbaahinta waxaa ka mid ah madax-bannaanida iyo xorriyadda xogta, xaqa cabbiraadda ra"yiga iyo dhaliisha.

3. Faaf reeb hordhac ahi waa reebban yahay.

4. Ciqaab iyo xayiraad midna kuma samayn karaan Weriyeyaasha iyo warbaahinta cid aan ka ahayn hay"adaha sharci ahaan u xilsaaran.

5. Suxufiyiinta iyo xarumaha warbaahinta Puntland waxaa ay ku midoobi karaan ururo-xirfadeed heer Puntland ah, *(professional unions/organizations)*, kaass oo difaaca, horena u mariya danhooda lehna nidaam dimoqraadi ah hoggaankiisa lagu doorto, xeerhoosaad iyo anshax midaysan.

6. Suxufiyiintu waxay ka mid noqon karaan ururro saxaafadeed mid heer qaran iyo mid heer gobol.

7. Warbaahintu xaq bay u leedahay in ay hesho oo galaangal u yeelato wararka iyo macluumaadka ummadda (public information), si loo wargeliyo dadweynaha, bulshaduna dhab ahaan ula socon karaan go''aamada la gaaray, sida lagu gaaray, iyo haddii danahooda loo adeegay. Sidaa daraadeed hay''adaha dawladda iyo kuwa dadweynaha ka dhexeeya waajib bay ku tahay in ay siiyaan oo u sahlaan warfidiyeenka iyo saxaafadda xogta iyo galaan-galka ay u baahan yihiin. Xeer-hoosaad gaar ah ayaa laga soo saari doonaa si loo qeexo hannaanka lagu hirgelinayo xaqa helidda xogta (access to information).

8. Warbaahintu xaq bay u leedahay in ay soo saarto, raadiso, faafiso xog ama warar ay u gudbinayso dadweynaha iyada oo adeegsanaysa mawjado loo xaddiday, khadad idaacadeed ama talefishan, khadad isgaarsiineed, daabacaad, internet, ama khadad kale oo wax lagu gudbiyo ama madal xogeed.

9. Warbaahintu waxaa ay xaq u leedahay in ay soo saarto warar ama xog ay iyadu leedahay, sidaa oo kale waxay soo saari kartaa xog, warar ama barnaamijyo ay ka qaataan il-wareed kale ama xarun warbaahineed oo kale oo dalka ama dibadda ku taal xogtaasna ay dib-u-baahin ama dib-u-daabicid ku samayn karaan. Warbaahintii dib u soo saarta ama dib-u-baahin ku samaysa warar, barnaamijyo ama macluumaad cid kale soo saartay, iyaga ayaa laga xisaabtamayaa qaadayana mas''uuliyadda wararka ama macluumaadka ay dib u soo saareen ama u baahiyeen, waxayna xushmaynayaan xuquuqda lahaanshaha iyo heshiiska ay la galeen cidda leh asalka xogtaas ama barnaamijkaas.

10. Suxufigu wuxuu u madax-bannaan yahay shaqadiisa ku saabsan raadinta iyo faafinta wararka iyo xaqiiqda la xiriirta hawlihiisa sida uu qabo dastuurka Puntland.

11. Cidina suxufiga kuma khasbi karto in uu sheego ilaha uu wararka ka helo.

12. Warbaahintu waa inay xushmaysaa dhawrsanaanta ama sirnimada xirfadeed, waana in adeegsataa xaqa diidista in markhaati la furo, sidaa daraadeedna ma shaacinayaan aqoonsiga dadka xogta bixiya haddii aan fasax cad laga helin.

13. Sababta qarsoonaanta waa in la qiimeeyaa inta aan warka ama xogta la baahin. Haddii markaa xarunta warbaahintu u aragto qarsoonaanta isha warka mid maangal ah ayna ku jirto danta ummaddu, markaa warka ama xogta waa la baahin karaa.

14. Suxufigu waa in uu magaciisa dhabta ah ku saxiixaa qoraallada uu qoro.

15. Weriyuhu xaq ayuu u leeyahay in la dhawro nabadgelyadiisa qofeed iyo sharaftiisa. Si xor ah ayuu u faafin karaa macluumaadka uu helay isaga oo ku socda nidaamka xeerkani farayo. Aragtida sideeda ayaa loo muujinayaa.

16. Mulkiilayaasha xarumaha warbaahinta waxay ilaalinayaan xuquuqda shaqaalahooda

17. Maamulayaasha xarun kasta oo warbaahineed waxaa waajib ku ah in ay heshiis qoran la gasho dhammaan shaqaalaha xaruntooda ka hawlgala, heshiiskaasna waxa lagu caddaynayaa arrimahan:

b) Nooca shaqadda iyo saacadaha shaqada
t) waajibaadka iyo xuquuqda shaqaaluhu leeyahay
j) fasaxyada jirrada iyo dhalmadda
x) Muddada heshiiska
kh) heshiis kasta waa inay saxiixaan shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha

18. Dhammaan heshiisyada shaqaalaha ee xarumaha warbaahinta waa in nuqul (copy) la geeyo xafiisyada wasaaradda warfaafinta, Wasaaradda Shaqada iyo shaqaalaha, hay'adda shaqaalaha rayidka ah iyo Ururka warbaahinta Puntland

## QODOBKA 4-AAD

### Shuruudaha Suxufiga

Suxufi waxaa noqon kara muwaadin kasta oo Soomaali ah, leh aqoon saxaafadeed oo heer Jaamacadeed ah ama aqoon machad saxaafadeed oo la aqoonsan yahay lehna hal sano oo waayo-aragnimo shaqo saxaafadeed ah.

## QODOBKA 5-AAD

### Aqoonsiga Suxufiga

1. Guddiga sare ee Warbaahinta Puntland ayaa suxufiga buuxiya shuruudaha ku xusan Qodobka 4-aad ee xeerkan siinaya aqoonsiga suxufinimo ka dib marka ay qaadaan tallaabooyinka lagu hubinayo xirfadda suxufinimo.
2. Suxufi kasta oo la siiyo aqoonsiga suxufinimo waxaa lagu qorayaa xogtiisa diiwaanka warfidiyeenka Puntland.
3. Suxufiga marka uu qaadanayo aqoonsiga waxaa laga qaadayaa khidmad dhan $ 30 dollar sanadkii hal mar, dakhligaasna waxaa lagu kabayaa miisaaniyadda xafiiska Guddiga sare ee Warbaahinta puntland, marka laga gooyo cashuurta dawladda oo la marin doono nidaamka dakhliga guud ee dalka.
4. Suxufiga shisheeye aqoonsiga uu kaga hawlgalayo puntland waxaa uu u marayaa sida ku cad farqada 1-aad ee qodobkan
5. Suxufiga shisheeye (Ajanabi) ee ka hawl-galaya puntland wax ka badan bil (30 casho) ee buuxiya shuruudaha ku xusan qodobka 15-aad ee xeerkan waxaa waajib ku ah in uu Guddiga sare ee Warbaahinta puntland ka qaato aqoonsiga uu ku hawlgalayo waxaana laga qaadayaa khidmad dhan $ 100 doollar (Boqol Doolar)
6. Suxufiga shisheeye (Ajnabi) ee ka hawl-galaya puntland 30 maalmood iyo wixii ka yar ee buuxiya shuruudaha ku xusan qodobka 15-aad ee xeerkan waxaa waajib ku ah in uu Guddiga sare ee warbaahinta puntland ka qaato aqoonsiga uu ka hawlgalayo waxaana laga qaadayaa khidmad dhan $50 doollar (konton Doolar)
7. Suxufiga shisheeye (Ajnabi) ee ka waramaya arrimaha bini-aadannimada ee buuxiya

shuruudaha ku xusan qodobka 15-aad ee xeerkan waxaa waajib ku ah in uu Guddiga sare ee warbaahinta puntland ka qaato aqoonsiga uu ku hawlgalayo muddo 30 maalmood ah, wax khidmad ahna laga qaadi maayo.

## QODOBKA 6-AAD
## Waxyaabaha ka reeban Warbaahinta

B) in la baahiyo:-

1) Wax kasta oo ka hor imanaya diinta Islaamka iyo dhaqanka suuban.

2) Warar Iyo dacaayado dhaawacaya nabadgelyada, xasilloonida qaranka, dhaqaalaha Iyo danaha guud ee ummadda Puntland;

3) Sirta Dawladda Puntland.

4) Warar, sawirro, filimmo ama qoraallo ka hor imanaya anshaxa saxaafadda Iyo

5) Qaddiyad maxkamadeed oo aan well go'aan laga gaarin

6) Xayaysiin Maandooriye sida khamrada, xashiishad, jaad, tubaako Iyo iwm

7) Waxyaabaha dhibaato u geysan kara ama dhalan-rogga ku samaynaya jirka qofka isticmaala;

8) Sawirro, muuqaallo ama filimmo dad qaawan, haddii aaney kallifin sababo cilmiyeed.

9) Tilmaaman dhibbane la fara-xumeeyey ama uuraysi aan dariiqii Islaamka ku iman, haddii aanu dhibbanahaasi oggolaan isaga/iyada oo ogsoon cawaaqibka ka dhalan kara marka la shaaciyo.

10) Shaacinta ruux ablaawe ah, haddii aaney jirin caddaymo saamixi kara oo sharci ahaan oggolaanaya.

11) In lagu takooro Diin, midab, jinsiyad, af, sinji, qabiil ama naafo.

### Duubis ama dhegeysi sir ah

T) Waxaa reeban:

1) Duubis ama dhagaysi sir ah oo la adeegsaday qalabka wax lagu duubo ama wax lagu basaaso.

2) Warar ama xog si qarsoodi ah taleefan loogu duubay, ama lagu helay qalabka dhegeysiga qarsoodiga ah, marka laga reebo in danta ummaddu ku jirto in sidaa la yeelo, isla markaana ayan suurto gal ahayn in macluumaadkaas si kale lagu helo.

3) In ay waraystaan ama sawirtaan carruur da"doodu ka yar tahay 15 sano, kalana hadlin

carruurtaas arnmuuro khuseeya daryeelkooda ama daryeelka carruur kale, haddii aaney waalidkood oggolaan, ama aanu goob-joog ka ahayn qof weyn oo mas'uul ka ah carruurtaas.

J. Xuquuqda Daabacashada

1). Waxaa la mamnuucay minguurinta ama isticmaalka hal-abuurka dadka iyo hantidooda maskaxeed (inteclectual property) iyada oo fasax looga haysan cidda leh.

2) Lahaanshaha qoraallada, sawirrada, filimada, heesaha, iyo agabka maqal-muuqaal waxaa dhawraya sharciga caalamiga ah ee xuquuqda daabacashada iyo xeerkan. Dib-u-minguurin kasta, qaybin, ama soo bandhigis agab aan la oggolaan in loo adeegsado ujeeddo warbaahin ama dib-u-daabicid waxay keeni kartaa tallaabo xukun oo sharci ah.

3) Sawirrada la dhalan rogo iyo agab kaleba oo looga jeedo khayaamo iyo marin habaabin waa reebban yihiin.

4) In la xuso cidda iska leh wax soo saarka saxaafadeed marka la isticmaalayo agabkooda waxay noqonaysaa mid suurta gal ah haddii ay dhacdo in aan la ogaan karin cidda leh xuquuqda daabacaadda, marka aan fasax la heli karin sababo maangal ah dartood iyo marka asalka agabka uu yahay mid si caam ah loo wada adeegsado. Tixraaca cidda leh xuquuqda daacaadda waa in ay u caadahay dadweynaha. Mas'uuliyadda arrinkanina waxaa ay saaran tahay warbaahinta.

## QODOBKA 7-AAD

## Diiwaangelinta Warbaahinta

1. Aasaaska xarun warbaahin saxaafadeed, oo dhammaystirta shuruudaha Xeerkan, waxa laga diiwaan-gelmayaa Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta, Dhaqanka Iyo Hiddaha (WWID&H).

2. Xarun warbaahineed hore u diiwaan-gashanayd, kuna kordhameysa qayb saxaafadeed cusub, waxa wax-qabadkaas cusub loo diiwaan-gelnayaa si waafaqsan habka diiwaan-gelinta.

3. Xafiis dawladeed, ururrada caalamiga ah, hay'ad ama shirkad gaar loo leeyahay oo qabanaya hawlo saxaafadeed, waxa ay ISU diiwaan gelinayaan si waafaqsan Xeerkan Saxaafadda, ururradaas waxaa kale oo looga baahan yahay in ay u hoggaan samaan sharciga nidaamiya ururrada, halka shirkadaha gaarka loo leeyahay Iyagana looga doonayo in ay u hoggaan samaan sharciga jira ee ganacsiga gaarka ah.

4. Hay'adaha warbaahintu waxaa ay Iska diiwaan gelinayaan WWIDH&H, waxayna ku dhaqmayaan sharciga ganacsiga gaarka ah ama sharciga Ururradda aan Dawliga ahayn (NGO).

5. Saxaafadda la daabaco sida wargeysyada ama jariidadaha waxaa magacyadooda laga diiwaan-gelinayaa WWIDH&H, halka shirkadda leh (publisher) daabacaadaha saxaafadeed marka ay soo saarayso wax soo saar noocyo kala duwan Iyo jaraa'id magacyo kala duwan leh waxaa ay u baahan tahay diiwaan-gelin Iyo in ay raacdo sharciga shirkadaha gaarka ah ee loogu talo galay ganacsiga gaarka ah ama sharciga

Ururrada aan dawliga ahayn (NGO) si ay u gudato waajibaadka canshuur bixinta, uguna hoggaansanto shuruucda shaqaalaha ee dalka ka jirta.

6. Shirkadda leh (mulkiilaha) daabacaadaha saxaafadeed ayaa mas'uul ka ah lagalana xisaabtamayaa maamulka maaliyadeed lyo macluumaadka lagu qoro daabacaadaheeda.

7. Tafaftirayaasha warbaahinta ayaa mas'uul ka ah falalka suxufiyiinta ka hoos shaqeeya lyo macluumaadka ay faafiyaan warbaahintooduba.

8. Muddada ku-dhaqanka ruqsadda la siiyo hay'adaha warbaahinta ee ay bixiso Wasaaradda Warfaafintu waa 12 bilood oo ka bilaabaneysa maalinta la soo saaro ruqsadda.

## QODOBKA 8-AAD

## Shuruudaha Diiwaangelinta

Codsiga diiwaangelinta waa in ay la socdaan tafaasiisha hoos ku qoran:-

1) Magaca mulkiilaha ama magacyada mulkiilayaasha hawl qabadka saxaafadeed
2) Magaca hay'adda warbaahineed yeelanayso lyo laanta warbaahinta haddii ay kala duwan yihiin
3. Magacyada tifatirayaasha hawl qabadka saxaafadeed oo ay aqoontooda mihnadeed sugan tahay
4. Nooca hawl qabadka saxaafadeed/warbaahineed ee la diiwaan-gelinayo iyo wakhtiga uu soo baxayo haddii ay warbaahintu tahay tan la daabaco
5. Cinwaanka hawl qabadka saxaafadeed iyo meesha ay ku taal sida :- degmo, xaafad, dariiq IWM
6. Hay'ad ama xarun warbaahineed ma hawl geli karto diiwaan-gelin la'aan
7. Diiwaangelin la'aan shaqada hawl qabadku waxay mudan kartaa xayiraad ilaa inta laga diiwaan-gelinayo
8. Mulkiilaha meherad kasta oo saxaafadeed waxaa markaa uu cinwaanka meherada bedelo la socodsiinayaa ururka saxaafada ee uu ka tirsan yahay & Wasaaradda warfaafinta, isgaarsiinta dhaqanka iyo hidaha

## Qodobka 9-aad

## Jaangooynta Hirarka

1. Mawjadaha idaacaduhu iyo telefayshanadu waa ilo dabiici ah oo xadidan, maamulka baaxada xuduudaha mawjadaha waxaa mas'uul ka ah WWIDH&H
2. Wasaaraddu waxay mas'uul ka tahay maamulka, xadaynta iyo bixinta hirarka Puntland si xaq ah oo muuqata ayeyna u bixinaysaa
3. Hirarka warbaahintu waa hanti qaran, mana geli karto cid wasaaradda aan ka haysan oggolaansho
4. Nidaam hoosaad gaar ah ayey wasaaradda warfaafintu ka soo saaraysaa hannaanka xadaynta, qeybinta iyo ilaalinta hirarka hawada

## Qodobka 10-aad

## Ruqsadaha & Khidmahada

## Khidmadaha ruqsaduhu waxay noqonayaan

1. Wasaaradda warfaafinta ayaa khidmad sanadle ah ama cusboonaysiin ka qaadaysa hay'adaha wartabinta si loo xoojiyo dakhli dawladeedka Puntland
2. Jaangoynta khidmadaha warbaahineed oo ruqsada la siinayo oo laga qaadayo waxaa lagu caddeynayaa xeerka khidmadaha warbaahinta Puntland
3. Hay"adda warbaahineed ee cusboonaysiin weyda ruqsaddeeda sannadle waxay mudanaysaa ganaax iyada oo loo eegaayo heerka shaqadeeda.

4. Nidaam-hoosaad gaar ah ayaa laga soo saarayaa khidmahada. Samaynta nidaamka khidmadaha warbaahinta waxaa ka wada-tashanaya Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta, Dhaqanka iyo Hiddaha (WWID&H), Wasaaradda Maaliyadda iyo Ururka Warbaahinta Puntland.

## QODOBKA 11-AAD

## Website

Websayt kasta oo wakiil ku leh Puntland waxaa laga diiwaan-gelinayaa Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta, Dhaqanka iyo Hiddaha (WWIDH) iyadoo la waafajinayo Xeerka Warbaahinta Puntland.

## QODOBKA 12-AAD

## Waxyaabaha ka Reebban Daabacaadlaha

1. Soo-saaridda wargeys ama qoraal soo-bixitaankiisa la mamnuucay ama aan oggolaansho ka haysan Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta, Dhaqanka Iyo Hiddaha.

2. Daabicidda qoraallo aan oggolaansho looga haysan mu'alifka (qoraaga).

## QODOBKA 13-AAD

## Lahaanshaha Warbaahinta Gaarka ah

1) Qof ama koox dad ah oo midoobay oo oggolaansho ka haysata Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta, Dhaqanka Iyo Hiddaha ayaa yeelan kara warbaahin gaar ah; waxaa kale oo ay oggolaansho ka haysanayaan wasaaradaha kale ee xeer ku leh si ay ugu hoggaansamaan sharciga ganacsiga gaarka ah Iyo kan hay'adaha aan dowliga ahayn nidaamiya.

2) Warbaahinta gaarka ahi waxa ay la socodsiineysaa Wasaaradda Warfaafinta iyo wasaaradaha kale ee xeer ku leh isbeddel kasta oo ku yimaada lahaanshaha warbaahineed sida iibin ama wareejin kale.

3) Warbaahinta dibadda iyo shaqsiyaadka kale ee danaynaya warbaahinta waxay wadaag la noqon karaan warbaahin jirta oo dalka laga leeyahay ama waxaa ay dhisan karaan warbaahin cusub oo u gaar ah ama mid ay wadaagaan shaqsiyaad kale.

4) Codsiyada lagu dalbanayo warbaahin gaar loo leeyahay waa in lagu caddeeyaa asalka raasamaalka lagu maalgeliyay.

## QODOBKA14-AAD

## Hab-raacyo Kale

1. Hey'ad caalami ah Iyo mid degaanba waxa ay la socodsiinayaan Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta, Dhaqanka Iyo Hiddaha marka ay tababarro warbaahineed ku qabanayaan Puntland.

2. Idaacaduhu waxa ay si xushmad leh u raacayaan nidaamka hirarka hawada *(frequencies)* ee Wasaaradda Warfaafintu dejisay.

3. Wasaaradda Warfaafintu waxaa ay Ilaalinaysaa khiiaafaadka ku saabsan qeybinta hirarka hawada

4. Ururada Suxufiyiinta iyo Guddiga Sare ee Warbaahinta waxa ay qaab dhismeedkooda iyo xeer-hoosaadkooda u soo gudbinayaan wasaaradda warfaafinta

   ➢ Xaqa jawaab-celinta:

   b) Marka hay'ad saxaafadeed tebiso ama muujiso qoraal ama muuqaal qadaf ah ama been ah xaq buu u leeyahay qofka ay khusaysaa in uu Isla hey'addaas jawaab-celin ka bixiyo.

   t) Saxaafadda warkaas oo kale baahisa ama qorta waxaa waajib ku ah in ay fursad u siiso qofka ay khusayso in uu sida ugu dhaqsaha badan jawaab-celin uga bixiyo meeshii markii hore laga baahiyey ama lagu qoray.

5. Machad kasta oo lagu baranayo cilmiga Saxaafada waa in uu oggolaansho ka helaa Wasaaradda Warfaafinta, isgaarsiinta, Hidaha iyo Dhaqanka Puntland

## QODOBKA 15-AAD

### Wariye Shisheeye

1. Weriye shisheeye oo ka socda wakaalad, wargeys, idaacad, telefishan ama saxaafad kale waxaa uu ka hawl-geli karaa oo keli ah Puntland marka uu oggolaansho ka haysto Wasaaradda Warfaafinta.

2. Wasaarad ama hey'ad dawladeed oo doonaysa in ay keensato weriye shisheeye, waxaa ay oggolaansho weydiisanaysaa Wasaaradda Warfaafinta.
3. Warbaahin qalaad ama wakiilladoodu waa ay ka hawl-geli karaan Puntland, xuquuqda iyo waajibaadkana waxay kala siman yihiin saxaafadda waddaniga ah.
4. Suxufi shisheeye looma oggola in uu galo ama sawiro xeryaha iyo fadhiisimada ciidammada iyo goobaha kale ee ku-meel-gaadh ahaan aan la oggolayn in la galo haddii aanu fasax ka haysan maamulka.
5. Hey'ad warbaahin ee ay ku caddaato in ay si sharcidarro ah ku keensatay suxufi shisheeye, xeel-dheere ama farsamo-yaqaan qalaad waxa ay mudanaysaa ganaax lacageed.

6. Weriye shisheeye oo fasax la'aan kaga hawlgala dhulka Puntland waxa uu mudanayaa ganaax lacageed oo lagu xusi doono Xeerka khidmada warbaahinta Puntland, waxyaabihii uu sawiray, duubay, ama qoray oo laga qaado, waana la masaafurinayaa.

## QODOBKA 16AAD

### QADAF AMA SUMCAD-DI (DEFAMATION)

1. Ihaano ama sumcad-dil waa jeedinta hadal ama bayaan been ah oo dhaawacaya sharafta ama sumcadda qof, meherad, wax soo saar, koox, dawlad, diin ama ummad..
2. Waxyaabaha dhaliya sumcad-dilka waxaa ka mid ah:-

   b) Hadal iyo qoraal been iyo sharaf-dil ah oo khuseeya cid kale

   t) Daabicid ama baahin hadal ama bayaan xaq darro ku ah cid oo qalabka warbaahinta lagu faafiyo

   j) Ihaanada waxay noqon kartaa mid qoraal ahaan loogu daabacay warbaahinta daabacan, ama hadal ahaan looga baahiyay qalabka warbaahinta
3. Warbaahinta looma oggola wax kasta oo dhaawacaya ama ihaano ku ah sharafta shakhsi kasta Iyo hay'ad kasta, haddii ayan u adeegayn danta dadweynaha.
4. Haddii qofi ama hay'adi (shartiisa/sharafteeda la dhaawacay), waxaa uu marka hore cabasho u gudbin karaa Guddiga Sare ee Warbaahinta, haddii go'aanka Guddiga Sare warbaahinta ay ku qanci waayaan mid kood labada dhinac, markaa waxaa uu

dhinacaasi dacwaddiisa/deeda u gudbin karaa maxkamad.

5. Runta ayaa ah difaac buuxa marka ay yimadaan dacwadaha la xiriira sumcad-dilka (sharafdilka).
6. Ka waramida danaha ummadda oo si cadaalad ah oo dheelitiran loo tebiyo waa difaac iyo tixgelin marka ay timaado xaalad ku saabsan sumcad dil
7. Haddii muddicigu (dacwooduhu) uu yahay qof warbaahinta ka dhexmuuqda, waa in uu caddeeyaa dhab ahaan dhaawaca ka soo gaaray qadafka uu dareemayo in loo geystay.
8. Eedaymaha loo soo jeediyo warbaahinta ama wariyaha ee ay ka dhallan karaan dacwad ciqaabeed waxaa dacwadaas laga oogi karaa maxkamadda ay khusayso dacwadaas, habka eedaynta iyo dacwad oogistana waxaa loo marayaa si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.

## QODOBKA 17-AAD

## Xeer-Hoosaad

1. Wasaaradda Warfaafintu waxay soo saaraysaa xeer-hoosaad lagu taabba-gelinayo, laguna hormarinayo Xeerkan Warbaahinta iyadoo lagala tashanayo daneeyayaasha xeer-hoosaadkani khuseeyo.

2. Heer hoosaadku wuxuu soo jeedinayaa:

   b. Helitaanka ama galaangal u lahaanshaha wararka iyo macluumaadka (Access to Information); sharci ku saabsan habka wararka iyo macluumaadka looga helayo xafiisyada dawladda iyo kuwa adeegga dadweynaha iyo qeexidda xuquuqaha iyo waajibaadka la xiriira arrimahan ee laga doonayo warbaahinta iyo dawladda).
   t. Nidaaminta Internetka (nidaam farsamo oo internet-ka ku saabsan).
   j. Xeer Warbaahinta Dawladda (state broadcast act) ayaa qeexaya doorka warbaahinta dawladda, lahaanshaheeda, qaab-dhismeedkeeda iyo sida ay ugu hoggaansamayso shuruucda kale.
   x. Warbaahinta dawladda waxaa loo baddelayaa mid dadweyne marka ay suurtagal noqoto, waxaana lagu dhisayaa sharciga warbaahinta dadweynaha (public broadcasting act) oo la soo saari doono.

## QODOBKA 18AAD

## Guddiga Sare ee Warbaahinta

1. Waxaa la dhisayaa guddi madax bannan oo maaraynaya howlaha saxaafadda Puntland, waxaana lagu magacaabayaa "Guddiga Sare ee Warbaahinta".
2. Ujeeddada weyn ee Guddiga Sare ee Warbaahintu waxa weeye in uu ilaaliyo himilada iyo xorriyadda warbaahinta si waafaqsan xeerkan.

3. Iyada oo lagu duulayo mabaadi'da asaasiga ah ee difaaca iyo horumarinta xorriyadda Fikirka, Guddiga Sare ee Warbaahintu ayaa xalliya khilaafaadka iyo murannada ka dhasha hawlaha saxaafadda.

4. Guddigu waxa uu dejinayaa Xeer-hoosaad iyo hannaan uu ku fuliyo waajibaadkiisa.

# QODOBKA 19AAD

## Waajibaadka Gudiga Sare ee Warbaahinta

1) Gudiga Sare ee Warbaahintu waxa uu nidaamiyaa, qiimeeyaana dhaqanka, anshaxa, edaabta hawl-wadeennada warbaahinta, isaga oo ilaalinaya xeerka saxaafadda.

waxaa kale oo uu u xilsaaran yahay:

b) Diiwaan-gelinta cabashooyinka iyo tabashooyinka ka yimaadda dadweynaha, warbaahinta iyo dawladda, wuxuuna qaataa go'aammo habboon oo uu ku maareeyo cabashooyinka.

t) Wuxuu dhexdhexaadiyaa oo ka garnaqaa murannada ama khilaafaadka u dhexeeya dadweynaha iyo warbaahinta, dawladda iyo warbaahinta, iyo murannada u dhexeeya warbaahinta.

j) Wuxuu qaadaa talaabooyin anshax-marin oo ka dhan ah warbaahinta gaarka ah, tan dawladda iyo suxufiyiinta iyo tifaftirayaasha.

x) Wuxuu hubiyaa sugnaanta riwaayadaha, maadeysyada, cajaladaha maqal, muuqaal (fiidiyooyada) ah, filimmada iyo aaladaha kale ee is-maandhaaf diimeed iyo kuwo dhaqan yeelan kara ka hor intaan dadwaynaha loo bandhigin.

## QODOBKA 20-AAD

### Xubnaha Gudiga Sare Warbaahinta

Guddiga saree e Warbaahinta wuxuu ka koobnaanayaa:

b) Wasiirka ama sarkaal sare oo ka tirsan Wasaaradda Warfaafinta

t) Wakiil ka tirsan Ururka Warbaahinta/Suxufiyiinta Puntland

j) Khabiir saxaafadeed oo ka socda Tacliinta sare Puntland.

x) Laba xubnood oo dadweyne, aan suxufiyiin ahayn, magac wanaagsan Iyo hufnaan ku leh bulshada dhexdeeda oo dallada ururada aan dawliga ahayn soo gudbiso

kh) Wakiil ka socda hay'daha warbaahinta Dawladda

d) Garyaqaan ka mid ah Ururka Qareennada Puntland.

## QODOBKA 21-AAD

### Dhisidda Xubnaha Gudiga Sare ee Warbaahinta

1) Xubnaha Gudiga Sare Warbaahinta waxa soo doorahaya ama magacaabaya hay'adaha ay wakiilka ka yihiin.

2) Magaca xubin kasta oo la doortay ama la magacaabay waxa loo gudbmayaa Wasiirka ama sarkaal sare ee wasaaradda ka tirsan oo Guddiga ka mid ah.

3) Guddigu wuxuu kulankiisa ugu horreeya ku dooranayaa Guddoomiye, guddoomiye ku xigeen, xoghayn Iyo khasnaji.

## QODOBKA 22-AAD

## Awoodaha Gudiga Sare ee Warbaahinta

1) Guddiga Sare Warbaahintu wuxuu yeelanayaa awood maamul, cinwaan loogu hagaago Iyo dhaqaale uu hawlihiisa ku fulin karo.

2) Si uu waajibaadkiisa u guto, Guddiga Sare ee Warbaahinta, Wasaaradda Warfaafinta Iyo Ururka Warbaahinta Puntland waxaa dhaqaale ahaan laga taageerayaa khidmadaha ay qaaddo Wasaaradda Warfaafintu.

3) Guddigu wuxuu yeelanayaa xeer-hoosaad Iyo siyaasad qeexan oo ku saabsan qodobbada soo socda:

   b) Xilalka xubnaha la doortay.

   t) Qaabka gudigu hawlgalkiisa umadda ugu wacyi gelinayo.

   j) Xuquuqda Is-difaaca suxufiga.

   x) Hannaanka Iyo qaabka dhexdhexaadinta (ka garniqidda) cabashooymka

   kh) Wixii arrimmo kale ah oo khuseeya Guddiga Sare ee Warbaahinta.

## Qodobka 23-aad

## Mudada Xilka iyo Xilwaayida

1. Mudada xilhayntu Guddigu waa 3 sanno
2. Luminta Xubinimada Guddiga

**Xubintu waxay xilka ku waayi kartaa sidan:-**

b) Geeri

t) Xilgudasho la'aan

j) Xubintu is casisho

x) wakhtiga xilka oo ka dhammaada

kh) Xukun Maxkamadeed oo ku dhaca xubinta

3. Xubinta ku weyda xilkeeda sida kor ku xusan qodobka 23-aad farqada 2-aad xarfaha (b,t,j,x,kh) buuxinta xilkaas waxaa loo marayaa habraacii ay ku timi xubintii hore

## QODOBKA 24AAD

### Awoodaha Guddiga Sare ee Warbaahintu Ku Qaado cabashooyinka

Guddiga sare waxaa uu awood u leeyahay in uu:

1. Anshax-mariyo warbaahinta Iyo suxufiyiinta Iyada oo la dabbaqayo xaqa-jawaab-celinta, dib-u-sixid, raalligelin dadweynuhu maqlaan oo la siiyo ciddii loo gafey, loona mariyo raalli-gelintaas Isla warbaahintii loogu gafey.
2. Anshax-mariyo shaqsiyaadka mas'uulka ka ah warbaahinta sida tafaftiraha guud, lagu soo rogayo Shaqa-laalid ku-meelgaar ah oo muddo cayiman iyadoo loo eegaayo hadba culayska gafka dhacay.
3. Ku xukumo magdhow (khasaara-bixin) hey'adda qofka gefka geystay ka tirsan yahay ama qalabkeeda lagu faafiyay gefkaas. Magdhowgaas ama ganaaxaasi waxa loo eegaya hadba awoodda dhaqaale ee hay'addaasi inta ay le'eg tahay.
4. Haday ku qanci wayaan warbaahinta gefka lagu soo eedeeyay iyo qofka soo eedeeyayba go'aanka gudigu gaaray waxay cabashadooda u gudbinayaan maxkamada awooda u leh.
5. Cabashooyinka waa in loo qaadaa si waafaqsan xeerar Iyo hab-dhaqan anshax oo u degsan oo ay ku heshiiyeen dhammaan daneeyayaasha warbaahinta. adeegga iyo hanaanka qaadista cabashooyin waa in uu noqdo mid uu si sahlan oo balaaran loo wada heli karo.

## QODOBKA 25-AAD

### Burin

Waxaa la buriyey xeer kasta oo saxaafadeed oo aan waafaqsanayn xeerka Warbaahinta Puntland.

## QODOBKA 26-AAD

### Dhaqan gal

Xeerkani wuxuu dhaqan-galayaa Marka Golaha Wakiilladu Ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland Saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

Prof, Cabdiweli Maxamed Cali Gaas

Madaxweynaha Dawladda Puntland